

XEER n. 83 rep.

MAAMULKA WALAAYADDA EE SOOMAALIYA

XOGHAYAHA GUUD

WAXA LA AQOONSADAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo siinayana fulin buuxda,

WAXA LA GAWAAQSADAY baahida loo qabo in la asaaso dowrooyin habeenkii la dhigo oo aasaasiga ah oo loogu talagalay dadka waaweyn si loo yareeyo akhris-qoris la'aanta loona faafiyo waxbarashada aasaasiga ah xitaa dadka waaweyn;

IYADOO LA TIXGELINAYO in Dugsiyada kor lagu soo tilmaamay ay lahaan doonaan barnaamijyo ka duwan saacadaha dugsiyada hoose ee soomaaliya in loo dejiyo barnaamij la soo gaabiyey sababta oo ah ciriiri badan oo ka jira shaxda waqtigooda, sidaas darteedna ay ku haboon tahay in loo sameeyo barnaamijyo khaas u ah Dugsiyadaas;

WAXAA LA GARTAY si wax looga dhigo dugsiyada kor ku tilmaaman waa in la caawiyaa, iyo sidoo kale shaqaalaha talyaaniga ee wax dhiga, carabta libiyaanka, ama macallimiinta degaanka u dhalatay ee maalintii dugsiyada wax ka dhiga in ay ku caawiyaan saacado wax dhigid dheeri ah xitaa kuwo is xilqaan ku dhiga.

WAXAA LA OGAADAY in loo baahan yahay in macallimiinta kor ku xusan la siiyo mushar saacad walba oo wax dhigid casharrada habeenki baxaya oo uu shax ka buuxinayo Maamulaha Dhexe Dugsiyada hoose;

MARKII UU DHEGEYSTAY Guddiga Dhexe ee Dugsiyada;

IYADOO LA TIXGELINAYO haddii ay dhacdo in uu maamuluhu maqnaado fasax awgiis shaqadiisa waxa qabanayo Xoghayaha Guud sida uu qabo qodob n.47 ee soo baxay 22 Luuliyo 1950;

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Dugsiga hoose ee habeenki ee Soomaaliya waxaa loo aasaasay dadka waaweyn oo dowrooyinkoodu soconayaan saddex sano iyaga oo raacaya shaxda iyo nadaamka shaqeynaya ee loogu talagalay dugsiyada hoose ee maalintii la dhigto ee Soomaaliyeed.

Qod. 2

Go'aanka kan xiga Maamulaha ayaa dejin doona barnaamijyada waxbarista ee dugsiyada hoose ee Soomaalida ee loogu tala galay dadka waaweyn.

Qod. 3

Macallimiinta dhiga dugsiyada hoose ee soomaliya ee dadka waaweyn heyststana shahaaddada sare ama mid u dhiganta waxa la siinayaa gunno ilaa Sh. So. 7.50 cashar kasta oo la bixiyey laba saac. Maccallimiinta aan heysan shahaaddooyinka kor ku tilmaaman waxa la dhimaa gunnooda ilaa nus.

Shaqaalaha maamulka ee wax dhigidda laga dhaafay waxa la siiyaa gunno sannadle ah oo dhan Sh. So. 25 dowrad kasta oo asaasiga dadka waaweyn loogu tala galay taas oo ay ka dhigaan dugsiyada iyaga hoos yimaada.

Qod. 4

Gunnooyinka lagu sheegay qodobka kore waxaa lagu bixiyaa iyadoo lagu saleynayo adeegyada qayaasta ku dhisan ee uu bixiyo macallin walba oo uu soo aruuriyo Maamulka Guud ee Dugsiyada Hoose ee Soomaaliya.

Qod. 5

Kharashaadka la xiriira gunnooyinka kor lagu soo tilmaamay waxay ka tirsanaan doonaa qodobka 67 mar labaad ee sannad maaliyadeed hadda socda iyo qodobka u dhigma ee sannadaha soo aadan.

Muqdisho 29 Maajo 1952.

XOGHAYAHA GUUD
Canino